Gunada ama lacagta dheeraadka ee Sfiga

Waxaad heli kartaa lacag haddii aad mudo gaaban aad ku dhameeysid waxbarshada luqada ee af Swiidhiska ah, ee looyaqaano sfi.

Macnaha loola jeedo waxaweeye haddii aad luqada waxbarasho ee af –Iswiidhishka ah ee looyaqaano SFI aad mudo gaaban ku dhameeysid waxaa markaa suurto gal noqonaysa in lacag aad helidoontid ama lagusiindoono.
Markaa dadka dhawaan yimid Iswiidhen waxa ay heystaan fursado ah in ay dhakhso u baran karaan luqada Iswiidhishka ah, waxaana markaa u fududaankara in ay dhakhaso shaqo ay u helaan.

Intey qiyastu leégtahay lacagta Sfiga lagusiindoono ama aad helidoontid?

Uguhoreeyn waa in aad ku guuleeysataa waxbarashada luqada Af-Iswiidhiiska ah, ee leh qeeybaha kaladuwan ee darajada luqada Af-Iswiidhiska, tusaale ahaan sida 1B, 2C ama 3D.

Waa inaad ku dhameysaa luqada Af-Iswiidhishka SFI mudo laba iyo toban bilood (12bilood) gudahood laga bilaabo marka aad bilowdid waxbarashada.

Haddii markaa aad ku guuleeysatid ama aad heshid ugu yaraan waxbarashada 1B waxa markaas lagu siindoonaa oo aad helidoontaa lacag dhan 6000kr.

Ama haddii aad ku guuleeysatid ama aad heshid ugu yaraan waxbarashada 2C waxa markaas lagu siindoonaa lacag dhan 8000kr.

Ama haddii markaa aad ku guuleeysatid ama aad heshid ugu yaraan waxbarashada 3D waxa markaas lagu siindoonaa ama aad helidoontaa lacag dhan 12000kr.

Lacagta ugu badan ee ardaygu helikaro waa 12 000kr

Haddii aad xaq u yeelato in lagu siiyo guno ama lacag waxbarasho cusub oo aad bilaawday,waxa markaa aad ka jareysaa lacagtii kale ee aad horey u heshay ama aad uqaadatay.

Lacagta lagusiiyey umabaahna in aad ka bixisid wax canshuur ah.

Waxaa kaloo intaas soo raaca in aan lagajareynin lacagyoowgii kaalmooyinka dhaqaale ee hore laguusiiyey iyo kuwa lasiiyo marka uu qofku uu dalka ku cusubyahay.

Sharciyada iyo qodobada udegsan si aad u hesho lacagta sfiga.

Sidii aad ku helilaheeyd lacagta loogutalagalay, SFIga Waxaa kamid ah tusaalooyinkan hoos ku xusan.

1. Waa in aad kadiiwaangashantahay deegaanka aad degentahay lagabilaabo 1 bishii 7aad ee sanadkan 2010.

2. Waa in da'daadu ay u dhaxeysaa 18 ilaa 64 sano.

3. Waa in aad uguyaraan aad ku guuleeysatay waxbarashada luqada Af-Iswiidhishka ah SFI,tusaale ahaan derajooyinka SFIga 1B, 2C ama 3D.

4. Waa inaad heshay ugu yaraan shahaadada
Waxabarasho ee ad ku guuleysatay laba iyo tobankii bilood ee ugu danbeeyey kadib markii laguu ogolaaday inaad bilowdo waxbarashada.

5. Waa in aad heshay ama haysataa ugu yaraan shahaadada aad ku guuleeysatay waxbarashada shan iyo toban kii bilood ee ugu danbeeyey.laga bilaabo markii aad ugu horeyntii iska diiwaan gelisay deegaanka aad degentahay.

6. Waa in aad dalab codsasho ah u dirtaa deegaanka aad degen
tahay, sadex bilood Marka ay ka soo wareegto kadib markii aad ku guuleeysatay waxbarashadaada.

Si aad u hesho lacagta sfi-ga waa in aad tahay qaxooti ama
aad u baahneyd magangelyo. Ama waa in aad haysataa sharci
joogitaan dalka, kaas oo tusaale ahaan aad ku heshay qooyskaaga oo ku sugan dalkan.

Lacgta sfiga waxa kaloo loogu tala galay dadka helay sharciga joogitaanka ku meel gaarka iyo kuwa loo ogolaaday iney joogaan Iswiidhen maadaama ay jirto caqabad ka hor taagan ka saaridda dalka.

Waxey si waadixa ah uguqorantahay, sharciga u degsen dadka aan u dhalan dalkan ama ah ajahanibka qodobkiisa 5 baaragaraafka 1aad, 2aad, 3aad, ama 3 a, 4aad ama 6aad, qodobka 12aad baragaraafkiisa 18aad, qodobka 21aad iyo qodobka 22aad.

Dadkan haökan tusaale ahaan ugu xusan ma heli doonaan lacagta sfiga.

- Dadka halkan wax ka baranaya waqti go'an.
- Dadka halkan u yimid iney ka shaqeeyaan.

La hadal degmada aad degentahay

Deegaankaaga wuxuu badanaa og yahay haddii aad xaq u leedahay gunada ama lacagta sfiga.Waxaa dhicikarta in mararka qaarkood in gacanyarayaasha deegaanka ay kaaga baahdaan in aad tustid cadeymaha sharciga kusugnaanta ama degenaanshaha deegaanka.Waxa aad kawareeysankartaa ama aad la hadlikartaa howl-wadeenada deegaanka aad degentahay haddii aad ubaahantahay macluumaad intaas dheer ama uu mad-madow uu kaaga jiro warbixinadaas.

Haddii aad ka bilowday waxbarashada luqada Af-Iswiidhishka deegaano kale, waa in markaas la timaadaa shahaado cadeyneysa goortii ama wakhtigii aad bilowday waxbarashada luqada Af Iswiidhiska. Ee looyaqaano SFI.

Sidan ayaad u dalbankareysaa lacagta ama gunada sfi-ga

Waxaad ka helikareeysaa degmada aad degentahay waraaqo loogutalo galey in lagu dalbado lacagyoowgaa waxbarasho ee luqada Af Iswiidhiska ah SFI.
Waraaqahaas waxa aad ku qoreysaa magacaaga, iyo taariikhda dhalashadaada, iyo deegaanka aad degan tahay ama meesha lagaala soo xiriiri karo,
Nooca waxbarasho ee aad ku guuleeysatey iyo meesha aad ka dhigatay luqada Af-Iswiidhiska sfi.

Ha buuxin qeybta kale ee banaan ee warqada. Sababta oo ah waxa taa iska leh oo buuxinaya deegaanka. Ha iloobin ugu danbeeyn in aad ku saxeexdid magacaaga.

Waxaa ku diinwaan gelindoona deegaanka ,iyagoo markaa diinwaan gelindoona magacaaga iyo taariikhda aad dhalatay.Waxaana lagu qoridoonaa laguna diinwaan gelindoonaa keeytka daatada oo uu leeyahay maamulka taclinta iyo waxbarashada.(Skolverket).

Maamulka taclinta iyo waxbarashada.(Skolverket)Waxaad kaloo ka helikareysaa shahaadooyinkaagii hore ee aad hore u heshay iyo wakhtigii aad dhamaysay waxbarashadaada tacliimeed. Waxaa intaas dheer in aan la diinwangelineynin cinwaanka deegaankaaga iyo nambarka telefoonkaaga.

Deegaanka aad degentahay ayaad weeydiinkartaa ama aad kalatashankartaa haddii aad qabtid wax suáalo ah oo intaas dheer, iyo wixii warbixino kale oo kusaabsan keytaka diinwaan gelinta iyo habka loo keydinayo magacaaga iyo taariikhda aad dhalatay.

Go'aan

Deegaanka aad degentahay ayaa go'aan kaa gaaraya haddii aad heleyso lacagta loogutalagaly sfi. Haddii aad qabto suáalooyin ku saabsan go'aankaaga, waxaad markaas aad la xiriiri kareysaa deegaanka aad degentahay.

Haddii aadan ku qanacsaneyn gó aamada degmada ka soobaxay, waxa markaas aad uga dacwoonkareysaa maxkamada racfaanka .

Marka aad direysid codsigaaga waxaad u fulinkareeysaa habkan hoos kuxusan.

Waa in aad buuxisaa warqada codsiga dalbashada, taas oo aad kulifaaqeeysid marka aad heshid shahaadada aad kuguleeysatay waxbarashada, islamarkaana aad ku cadeeynaysid in aad natiijo wanaagsan aad ka gaadhay waxbarashadaada. Tusaale ahaana waxaa kamid ah darajooyinka kaladuwan ee Af-Iswiidhiska ah SFI-ga 1B, 2C ama 3D. Iyo haddii aad buuxin karto shuruudaha.

Waa in aad udirtaa ama geysaa waraaqaha codsiga dalbashada deegaanka aad degentahay ugu danbeyn sadax bilood kadib marka aad heshay shahaado waxbarasho ee aad kuguuleeysatay.

Deegaanka aad degentahay ayaa kuu sheegi doona haddii waraaqoyinkale lagaaga baahanyahay in aad keentid ama aad soodirtid

Deegaanka ayaa go'aaminaya haddii aad heleyso gunada ama lacagta sfi-ga.

Haddii laguu ogolaado lacagta sfi-ga

Waxa markaa lacagta laguugu soo shubidoonaa akoonka bangigaaga.

Waxaan kuu rajeeyneynaa nasiib wacan oo wanaagsan dalbashada lacagta SFI-ga, iyo in waxbarashada luqada Af Iswiidhiska SFI-ga aad meelwanaagsan ka gaartid.

La xidhiidh deegaanka aad degentahay haddii aad qabtid su'aalooyin laxidhiidhsan lacagta luqada Af-Iswiidhishka.